




CUDURKA QAAXADA



Waa maxay Cudurka Qaaxada?

Qaaxadu waa jeermis yar kaas oo aad ka neefsan karto sanbabadaada

Mararka qaarkood jeermiska qaaxadu waxay ku jiri kartaa sambabadaada muddo wakhti dheer ah. Ma dareemi doontid jirro oo mana faafin kartid jeermiska.



Haddii jeermisku noqoto mid firfircoon, waxa ay ku kori karaan sambabbadaada oo ay ku keeni karaan jirro. Waxaad ku faafi kartaa jeermiska marka aad qufacdo, hindhisto ama aad qososho.



Waxa aad iskaga baari kartaa xafiiska dhakhtarka si aad u ogaato in aad leedahay jeermiska qaaxada iyo in kale. Haddii aad is baadho, markaa ka dib waxaad qaadan kartaa daawooyin aad ku disho jeermiska.

